


Ku soo dhawoow Aqoon Isweydaarsiga Dadweynaha ee Gegiga Caalamiga ah ee Seattle-Tacoma Daraasadda Buuqa ee Qaybta 150

Port of Seattle (Dekedda) ayaa kugu soo dhawaynaysa kaagana mahadcelinaysa ka soo qaybgalka aqoon isweydaarsigan dadweynaha ee Daraasadda Iswaafajinta Buuqa iyo Isticmaalka Dhulka ee Qaybta 150 ee Seattle-Tacoma International Airport (SEA). Dekeddu waxay daraasaddan u diyaarinaysaa SEA, taas oo loo yaqaan “Daraasadda Qaybta 150,” iyadoo raacaysa habka lagu qeexay Cinwaanka 14 ee Ururinta Xeerarka Federaalka (CFR) Qaybta 150, *Qorshaynta Iswaafajinta Buuqa Garoonka Diyaaradaha*. Tani waa cusboonaysiintii afraad ee Daraasadda Qaybta 150 ee SEA, iyadoo Daraasaddii ugu dambaysay la dhammaystiray 2014. Sida ay dhigayaan 14 CFR Qaybta 150, Dekeddu waxay Khariidadaha Soo Gaadhista Buuqa (NEMs) ee kama dambaysta ah u gudbisay Maamulka Duulista Federaalka (FAA) bishii Juun 2026. NEMs waxay muujinayaan qaabka garoonka diyaaradaha, xariiqyada heerarka buuqa, iyo isticmaalka dhulka ku hareeraysan, waxaana lagu soo bandhigay Aqoon Isweydaarsiyada Daraasadda Qaybta 150 ee la qabtay bishii Oktoobar 2025. Dekeddu waxay hadda dib u eegaysaa tallaabooyinka suurtagalka ah ee yaraynta buuqa, isticmaalka dhulka, iyo maamulka barnaamijyada si loogu taliyo in lagu daro Barnaamijka Iswaafajinta Buuqa (NCP).

Booqo www.seapart150.com si aad u hesho macluumaadka ugu dambeeyay, oo ay ku jiraan agabka halkan lagu soo bandhigay.



Hordhaca Qaybta 150

Maamulka Duulista Federaalka (FAA) ayaa soo saaray 14 CFR Qaybta 150 sannadkii 1985, waxayna garoomada diyaaradaha siinaysaa hab rasmi ah oo wax looga qabto buuqa garoonka diyaaradaha iyo isticmaalka dhulka ee aan la jaanqaadayn buuqa. “Isticmaalka dhulka ee aan la jaanqaadayn buuqa” waa dhul uu gaadho buuqa diyaaradaha ee ka sarreeya heerka Federaalka ee loo dejiyay saamaynta buuqa.

Daraasadaha Qaybta 150 waxay leeyihiin laba weji. Wejiga NEM, oo loo dhammaystiray Daraasaddan, wuxuu soo bandhigayaa heerarka hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee soo gaadhista dhawaaqa diyaaradaha. Wejiga NCP, oo hadda socda, wuxuu soo jeedinayaa tallaabooyin wax looga qabanayo buuqa diyaaradaha. Waxaa la filayaa in Warbixinta NCP la daabaco 2027, waxaana la filayaa in FAA ay ansixiso NCP 2028.

Qaabka Aqoon Isweydaarsiga Dadweynaha

Aqoon isweydaarsigan wuxuu leeyahay qaab “kulan u furan dadweynaha” mana jiri doonto soo bandhigid rasmi ah. Tani waxay ka soo qaybgalayaasha siin doontaa fursadaha ugu badan ee wada sheekaysiga qofba qofka kale la yeesho waxayna ka qaybgalayaasha u oggolaan doontaa inay wadaagaan macluumaad, fikrado, iyo walaacyo ku saabsan tallaabooyinka suurtagalka ah. Waxaa qolka oo dhan ku yaal goobo ku saabsan habka Daraasadda Qaybta 150, iswaafajinta buuqa diyaaradaha iyo isticmaalka dhulka, iyo tallaabooyinka suurtagalka ah ee Barnaamijka Iswaafajinta Buuqa ee la tixgelinayo.



Looxyada waxaa loo habeeyay goobo, kuwaas oo kugu hagaya qaybaha ay ka kooban tahay Daraasadda Qaybta 150. Looxyada ka sokow, goobo loogu talagalay doodaha miisaska ee ka qaybqaadashada leh ayaa ku yaal qolka oo dhan si ay u bixiyaan fursado dood iyo ra'yi dhiibasho. Waxaan kugu dhiirrigelinaynaa inaad booqato goob kasta oo aad dib u eegto agabka la bixiyay. Xubnaha Kooxda Daraasadda ayaa diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalo kasta oo aad qabto..www.seapart150.com.

Goobta 1: Habka Daraasadda Qaybta 150 iyo Barnaamijka Iswaafajinta Buuqa ayaa kugu hagaya habka daraasadda ee ay dhigayaan 14 CFR Qaybta 150, oo ah xeerka federaalka ee dejiyay habraaca la raacayo marka la qiimaynayo buuqa diyaaradaha ee gaadha bulshooyinka ku hareeraysan, iyo sidoo kale marka la samaynayo barnaamij lagu hubinayo in isticmaalka dhulka ku hareeraysan uu la jaanqaado buuqa la filayo inuu gaadho.

Goobta 2: Tallaabooyinka Yaraynta Buuqa waxay bixiyaan macluumaad ku saabsan tallaabooyinka suurtagalka ah ee yaraynta buuqa ee ay aqoonsadeen daneeyeyaasha, xubnaha bulshada, Kooxda Daraasadda, kuwaas oo la qiimeeyay si loo eego suurtagalnimada in lagu daro qayb ka mid ah habka Barnaamijka Iswaafajinta Buuqa (NCP).

Xarunta 3: Tallaabooyinka Icticmaalka Dhulka waxay bixiyaan macluumaad ku saabsan tallaabooyinka suurtagalka ah ee isticmaalka dhulka ee la aqoonsaday lana qiimeeyay si loo eego suurtagalnimada in lagu daro NCP. Ka sokow dahaarka dhawaaqa, tallaabooyinkani waxay matalayaan fikrado iyo xeelado bilow ah oo maamullada ku hareeraysan ay tixgelin karaan inay qaataan si ay gacan uga geystaan wax ka qabashada walaacyada hadda jira iyo kuwa mustaqbalka ee iswaafajinta buuqa.

Xarunta 3: Tallaabooyinka Maamulka Barnaamijyada waxay bixiyaan macluumaad ku saabsan tallaabooyinka suurtagalka ah ee maamulka barnaamijyada ee la aqoonsaday lana qiimeeyay iyagoo qayb ka ah habka NCP. Tallaabooyinkan waxaa hirgelin karta Dekedda si loo wanaajiyo barnaamijyada hadda jira ama loo aasaaso hindisayaal cusub.

Doodaha Miisaska ee Ka Qaybqaadashada Leh waxay bixiyaan fursad aad si toos ah ula falgasho shaqaalaha Dekedda iyo xubnaha Kooxda Daraasadda, su'aalo ku waydiiso, kaga dooddo tallaabooyinka suurtagalka ah ee yaraynta buuqa, isticmaalka dhulka, iyo maamulka barnaamijyada, oo aad kula wadaagto ra'yigaaga ku saabsan talooyinka suurtagalka ah ee NCP.

Sida Loo Gudbiyo Faallooyinka

Waxaan soo dhawaynaynaa ra'yigaaga, waxaanan kugu dhiirrigelinaynaa inaad muujiso fikirradaada oo aad wadaagto fikradahaaga ku saabsan buuqa ay dhaliyaan diyaaradaha ka hawlgala SEA. Ra'yiga la helo ayaa la tixgelin doonaa inta lagu jiro diyaarinta Daraasadda oo dhan. Waxaad ku bixin kartaa faallooyin qoraal ah inta lagu jiro Aqoon Isweydaarsigan Dadweynaha adigoo adeegsanaya foomamka faallooyinka ee la heli karo, ama waxaad faallooyin u diri kartaa P150@portseattle.org ama boostada ugu diri kartaa:

**Aviation Noise Programs, C/O SEA Part 150 Study
17801 International Blvd., Suite #6012M
Seattle, WA 98158-12025**